

Xarunta Agoonta Ugaas Khaliif Beledweyne
-Baaq iyo Codsi-

16/03/2017

Warbixin kooban

Xarunta Agoonta Ugaas Khaliif ee Beledweyne waxaa la hirgaliyay (aasaasay) sannadkii 1998, ayadoo lagu bilaabay tiro yar oo 50 (konton) canug ah iyo degaan kooban oo heerkiisu hooseeyo.

Sanadkii 2011-kii ayaa la dhammeystiray dhismaha degaanka agoonta ee bilicda iyo baaxadda isku darsaday oo hadda Jira.

Xog qodobaysan oo ku saabsan Xarunta:

1) Xaruntu waxa ay ku taallaa Xaafadda Buundaweyn/Filtro, isla goobtii ahaan jirtay “**Hooyga Agoonta Beledweyne - Centro Orfanotrofio di Beletuen**” ee la baabi’iyaya 1965-kii, martkaas oo intii da’da yareeyd loo wareejiyay Xamar intii kalena la kala diray. Sidoo kale, waxa Xarunta ka mid noqday oo xayndaabkeeda soo galay, qaybtii Dugsiga Hoose Buundaweyn ee ku sii jeeday dhanka ceelka Filtro.

2) Waxaa hadda ku jira tiro carruur 100 canug ah:

a- 70 wiilal

b- 30 Gabdho

3) Habka iyo Shuruudda Xulashada Carruurta (Centre policy selection): Waxaa tixgalin gaar ah la siiyaa ilmaha ugu liita, gaar ahaan, kuwa isku darsaday agoonnimo iyo rajaynimo (aabbo iyo hooyo laawe).

4) Inkastoo ay dhici karto in marka loo eego habka boqoleeyda (%) lagu kala badnaan karo, haddana carruurta waxa ay isugu jiraan kuwo ka soo jeedaa dhammaan Beelaha dega Gobolka Hiiraan, sidoo kale waxaa ka mid ah kuwo ka soo jeeda Soomaalida Itoobiya iyo Gobolada deriska ah.

5) Xaruntu waxa ay bixisaa daryeel isugu jira: **Jiif, Cunto, Caafimaad iyo Waxbarasho** (Dugsi quraan iyo aqoonta maadigaa heerka Hoose/Dhexe).

6) Ganacsato iyo Jaaliyadaha dibadda ayaa inta badan bixin jiray kharajka ku baxaya socodsiinta Xarunta. Hase yeeshee, muddooyinkaan dambe waxaa yaraaday oo si weyn isu dhimay tabarucii lacageed ee Xarunta u soo xaroojiray. Taas ayaa sababtay in tiradii Carruurta oo markii hore ahayd 150 (120 wiilal iyo 30 gabdho) ay hadda ku soo uruurtay 100 canug.

7) Markii hore, waxa Siyaasadda Xarunta Agoonta (Orphanage Centre policy) ka mid ahaa in canugu marka uu gaaro Dugsiga Sare uu Xarunta ka baxo, ayadoo intii suurtoagal ah loo raadinayo cid Waxbarashadiisa kafaala qaada (isboonsarta). Isla markaana kii baxay lagu soo bedelo “yatiin” kale oo da’ahaan yar. Hase yeeshee dhaqaale xumo awgeed bedelkaasi, ilaa xad, hadda waa hakaday oo lama awoodo. Waana taas, sababta keentay in tirada agoontu hoos u dhacdo oo ay hadda tahay 100.

8) Gabdhuhu waxa ay xarunta ku leeyihiin dhammaan daryeelka kale marka laga reebo jiifka oo ayagu magaalada u aadaan.

Baraarujin

1) Nabiga (NNKH) waxaa laga wariyay in uu yiri: “qofkii agoon daryeela iyo aniga Jannada wa u siman nahay (waa wada galeyana) sidaas oo kale”. asagoo labadiisa farood simay si uu arrintaas u muujiyo.

2) “Rabbi addoonkiisa waa u gargaaraa inta asaguba uu u gargaarayo walaalkiisa baahan”.

Codsi iyo Baaq

Xarunta waxaa, intii muddo ah, la soo gudboonaatay dhaqaale xumo (financial crises) saameeyn weyn ku yeelatay nololsha iyo degaanka agoonta. Waxaa tusaale kuugu filan muuqaal gogosha oo ah wax laga naxo oo dhaawacaya damiirka iyo dareenka qofkii arka ama ishiisu ku dhacdo. Haddaba, waxaa qof kasta oo awooda laga codsanayaa in uu ka qayb qaadato “**Mashruuca Taakuleynta Xarunta Agoonta Ugas Kahliif**” ayadoo la bixinayo bishii £10 (toban), sanadkii £120 (boqol iyo labaatan) ama wax u dhigma xagga sarifka.

In hal mar la bixiyo lacagta tabaruca waxa ay sahleysaa in Xaruntu yeelato qorshe iyo ku talagal lagu maareeyo baahida Agoonta.

Qaabka Lacag bixinta:

1) Haddii aad jooto UK fadlan la soo xiriir :

a- Dirir Cabdi Ibrahim (Goodax) Tel: 07960956384

b- Ibrahim Cali Saney Tel: 07903012283

t- Xawaaladda Ammano Express Wembley oo magaca Xarunta Xisaabi uga furan tahay.

2) Haddii aad joogto meel ka baxsan UK, fadlan la xiriir Dahabshiil Beledweyne oo magaca Xarunta Xisaabi uga furan tahay ama Maamulaha Xarunta Aden Shariif (tel: 00252615510392). Waa haddii ay kugu adag tahay in aad annaga nala soo xiriirto (Dirir iyo Ibrahim).

Shan muuqaal Xarunta Agoonta: Albaabka hore, Hooyga, Qayb ka mid ah Agoonta oo safan iyo sida hadda Gogosha tahay.





Diyaariye:

Dirir Cabdi Ibrahim

deqgodah@hotmail.com

dirirgodah@gmail.com

London